Ogeysiiska Isticmaalidda HIPAA ee Baarista COVIDCheck Colorado Macluumaadkaaga. Xuquuqdaada. Waajibaadkeena.

Ogeysiiskan waxa uu qeexayaa sida loo isticmaali karo loona shaacin doono macluumaadka caafimaadkaaga iyo sida aad adigu u heli karto macluumaadkan. **Fadlan si taxadar leh u akhriso.**

Xuquuqdaada

Waxa aad xaq u leedahay:

- Helidda koobbi ah feylkaaga caafimaadka oo ah waraaq ama feyl shaashadeed
- Sixid ah waraaq ama feyl shaashadeed in aad ku sameyn karto feylkaaga caafimaadka
- Codsiga xogdhowrid ah qarsoodi
- Codsi aad ku yareyneyso macluumaadkaaga la sii wadaagi karo
- Helid ah liiska meelaha lala sii wadaagay macluumaadkaaga
- Helidda koobbi ah isticmaalidda xogtaada shakhsiga ah:
- Doorashada qof adiga ku matala
- Soo-xareysasho ah cabasho haddii aad rumeysan tahay in lagu xadgudbay xuquuqdaada gaarka ah

Waxyaabo Aad Kala-dooraneyso

Waxaa jira waxyaabo aad adigu kala dooran karto oo ah sida loo isticmaalayo iyo sida loo sii wadaagi karo macluumaadkaaga:

- In qoyskaaga iyo asxaabtaada loo sheego xaalkaaga
- In lagu siiyo gargaarka masiibooyinka

Isticmaalidda iyo Shaacinta Xogtaada:

Sababaha aan macluumaadkaaga u isticmaali karno una wadaagi karno:

- Si aan kuu daaweyno
- Si aan ugu maareyno hawlaha shaqada
- Si aan ugu raadsan karno qaansheegadka adeegyada
- Si gacan looga geysto arrimaha caafimaadka iyo badqabidda dadweynaha
- Si aan ugu sameyn karno cilmi-baaris
- Si aan ugu hoggaansami karno sharciga
- Si aan ugu eegno magdhowga shaqaalaha, arrimo la xiriira sharciga, iyo codsiyada kale ee dowladda:
- Si aan uga jawaabno dacwado iyo eedeymo sharci ah

Xuquuqdaada

Marka laga hadlayo macluumaadkaaga caafimaadka, waxaad leedahay xuquuqo badan. Qeybtan waxa ay sharxaysaa xuquuqahaaga iyo qaar ka mid ah waajibaadkaaga si aad ku hesho caawimaad.

Inaad koobbi ka hesho feylkaaga caafimaadka oo ah feyl shaashadeed ama waraaq

- Waxaad soo codsan kartaa in aad aragto ama aad koobbi ka hesho feylkaaga caafimaadka oo ah waraaq ama feyl shaashadeed iyo macluumaadkaaga kale ee caafimaadka ee aan kaa hayno. Naga soo codso sida aad rabto.
- Waxa aan koobbi ama qoraal kooban kaa siineynaa macluumaadkaaga caafimaadka, oo sida caadiga ah 30 maalmood gudahood ayaad nooga heleysaa. Waxaa laga yaabaa in aad bixiso lacag yar oo macquul ah, oo ah kharashka hawshaada.

Naga soo codso inaan wixii khaldan ka saxno feylkaaga caafimaadka

- Waxaad naga codsan kartaa in aan saxno macluumaadkaaga caafimaadka ee khaldan ama aan dhammeystirneyn. Naga soo codso sida aad rabto.
- Waxaan codsigaaga oran karnaa “maya”, laakiin waa in aan sababta kuugu sheegeyno si qoraal ah 60 maalmood gudahood.

Codsiga xogdhowrid ah qarsoodi

- Waxaad naga soo codsan kartaa in laguula soo xiriiro si gaar ah (tusaale ahaan, taleefan ah guriga ama xafiiska) ama in waraaqaha laguugu soo diro cinwaanka aad rabto.
- Waxaan codsiyada macquulka ah oo dhan uga jawaabnaa "haa".

Naga soo codso in aan xadidno isticmaalka ama wadaagidda xogtaada ee meelaha kale

- Waxaad naga codsan kartaa in aan macluumaadka caafimaadka la isticmaalin ama aan lala wadaagin arrimaha daaweynta, lacag-bixinta, ama hawlaha kale. Shuruud naguma aha in aan kaa aqbalno codsigaaga, oo waxaan kuugu jawaabi karnaa "maya" haddii ay jirto saameyn ku imaaneysa daryeelkaaga.
- Haddii aad adigu si buuxda isaga bixineyso adeeg laguu qabtay ama wax kale oo la xiriira daryeelkaaga caafimaadka, waxaad naga codsan kartaa in aanan macluumaadkaas ula wadaagin ceymiskaaga ujeeddo la xiriirta lacag-bixin ama wax ah hawlo kale. Waxaan kuugu soo jawaabnaa "haa" haddii uusan jirin sharci nagu amraya in aan macluumaadkaas meelo kale la wadaagno.

Helidda liiska meelaha aan macluumaadkaaga la wadaagnay:

- Waxaad naga soo codsan kartaa liiska (wax u kala qoran) wakhtiyada aan meelo la sii wadaagnay macluumaadkaaga caafimaadka ilaa iyo lix sano oo ka horreysa taariikhda codsigaaga, meelaha aan la wadaagnay, iyo sababta mid kasta.
- Waxaan kuu soo direynaa meelaha aan u gudbinnay arrimahaaga oo dhan marka laga reebo daaweynta, lacag-bixinta, iyo hawlaha kale ee daryeelka caafimaadka, iyo meel kale oo gaar ah (sida wax kasta oo aad adigu naga soo codsatay in aan kuu sameyno). Waxaad halkii sano naga heli kartaa qoraalka aad naga codsato oo isku hoos taxan oo ah bilaash, laakiin waxaan kugu soo dallacaynaa khidmad yar oo macquul ah, oo ah kharashka la galayo haddii aad mar labaad qoraalka naga soo codsato ilaa iyo 12 bilood gudahood.

Helidda koobbi ah isticmaalidda xogtaada shakhsiga ah:

Markaad rabto ayaad naga soo codsan kartaa koobbi ah waraaqda isticmaalidda xogtaada, xataa haddii aad rabto in aad ku hesho hab shaashadeed ama ah intarnetka. Waxaan si degdeg ah ku siineynaa koobbi ah waraaqdaas.

Doorashada qof adiga ku matala

- Haddii aad qof u saxiixdo inuu kaaga qareemo go'aaminta arrimahaaga caafimaadka ama haddii uu qof kuu yahay masuul ama ilaaliye sharci ah, qofkaas ayaa ka hadli kara

xuquuqahaaga oo waxa uu kala-doorasho kuugu sameyn karaa macluumaadkaaga caafimaadka.
- Waa in aan hubin karno in aad qofka u oggolaatay xuquuqdaas oo uu adiga sifo sharci ah kuu matali karo ka hor inta aanan wax tallaabo ah qaadin.

Soo dirso cabasho haddii aad dareemeyso in lagu xadgudbay xuquuqdaada

- Waxaad ka soo caban kartaa haddii aad dareemyso in aan ku xadgudubnay xuquuqdaada, oo waxaad nagala soo xiriiri kartaa macluumaadka hoos kuugu qoran.
- Waxaad cabashadaada u gudbisan kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga, oo waxaad waraaqaha ugu soo dirtaa cinwankooda oo ah 200 Independence Avenue, SW, Washington, DC 20201, ama soo garaac 1-877-696-6775, ama booqo **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.**
- Ma dhici karto in aargoosi laguugu sameeyo dacwo aad qoratay awgeed.

Waxyaabo Aad Kala-dooraneyso

Macluumaadka caafimaadka qaarkood, adiga ayaa noo sheegi kara sida aan meelo kale ula sii wadaagi karno. Haddii aad adigu doorbideyso sida aan macluumaadkaaga meelo kale ula sii wadaageyno ee ku cad siyaabaha hoos ku qoran, waa in aad nagala hadasho. Adigu noo sheeg waxa aad rabto in aan kuu sameyno, si aan kuugu raacno waxaad noo sheegto.

Xaaladahaas oo kale, waxa aad xaq u leedahay in aad noo sheegto waxa aad kala dooraneyso:

- In aan macluumaadkaaga la wadaagno qoyskaaga, asxaab kugu dhow, ama dad kale oo ku lug leh daryeelkaaga.
- In aan meelo kale la wadaagno macluumaadkaaga xaaladaha gargaarka musiibooyinka.

Haddii aadan awoodin in aad noo sheegto waxa aad doorbideyso, tusaale ahaan haddii aadan miyir lahayn, waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga la wadaagno meelo kale marka aan rumeysannahay in ay adiga dantaadu ku jirto. Waxa kale oo laga yaabaa in aan macluumaadkaaga la wadaagno meelo kale marka loogu baahdo si loogu yareeyo halis daran oo degdeg ah oo ku imaan karta caafimaadkaaga ama badqabiddaada.

Isticmaalidda iyo Shaacinta Xogtaada:

Sidee baan caadi ahaan u isticmaaleynaa ama meelo kale ula wadaagneynaa macluumaadkaaga caafimaadka?

Sida aan caadi ahaan u isticmaaleyno ama aan meelo kale ula wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga waa siyaabaha soo socda.

Si aan kuu daaweyno

Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaali karnaa ama la wadaagi karnaa xirfadleyaasha kale ee caafimaadka ee ku daaweynaya.

Tusaale: Dhakhtar kaa daweynaya dhaawac ayaa dhakhtar kale ka soo codsanaya xaaladdaada caafimaadka guud.

Si aan ugu maareyno hawlaha shaqada

Waxa laga yaabaa in aan isticmaalno oo aan meelo wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga si aan ugu gudan karno adeegyada aan sameyno, si aan ugu hagaajin karno daryeelka, iyo si aan kuula soo xiriirno markii loo baahdo.

Tusaale: Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaaleynaa si aan uga shaqeyno daaweynta iyo adeegyada aan naga filaneyso.

Si aan ugu raadsan karno qaansheegadka adeegyada

Waxa aan macluumaadkaaga caafimaadka u isticmaali karno ama aan meelo kale ula sii wadaagi karno waa qaansheegad aan lacagta kugu baxda uga soo heleyno ceymiska caafimaadka ama hay'ado kale.

Tusaale: Waxaan macluumaadkaaga siineynaa ceymiska caafimaadka si aan uga heleyno lacagta adeegyada.

Waxa aanan sameyn karin

Macluumaadkaaga meelo kale ulama wadaagi karno wax noqon kara suuqgeyn ama xayeysiis, oo marna ma sii iibin karno macluumaadkaaga shakhsiga ah.

Waa sidee siyaabaha kale ee aan u isticmaali karno ama meelo kale ula wadaagi karno macluumaadkaaga caafimaadka?

Waxaa jira siyaabo kale oo shuruud nagu ah ama na loo oggol yahay in aan macluumaadkaaga meelo kale ula sii wadaagno – oo badanaaba waa wax dan ugu jirto dadweynaha, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi-baaris. Waa in aan ka soo baxno shuruudo badan oo sharciga waafaqsan ka hor inta aanan macluumaadkaaga meelo kale ula sii wadaagin sida sharciga ku qoran. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eego: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html.

Si gacan looga geysto arrimaha caafimaadka iyo badqabidda dadweynaha

Sababaha aan macluumaadkaaga caafimaadka meelo kale la sii wadaagi karno waa xaalado dhowr ah sida:

- Ka-hortaggidda cudurrada
- Caawimaad ah dibu-soocelinta alaabo cillad lagu arkay
- Soo-sheegidda waxyeello lagu arkay daawo
- Soo-sheegidda tacaddiyo laga shakisan yahay, dayacaad, ama tacaddi ka jira qoys gudihiis
- Ka-hortagid ama yareynta khatar daran oo saameyn karta caafimaadka ama badqabidda dadweynaha oo dhan

Si aan ugu sameyn karno cilmi-baaris

Waxaan macluumaadkaaga u isticmaali karnaa ama meelo kale ula sii wadaagi karnaa cilmi-baarista caafimaadka awgeed.

Si aan ugu hoggaansami karno sharciga

Waxa aan macluumaadkaaga meelo kale la sii wadaagi karno waa haddii ay sharciyada gobolka ama federaalka shuruud noo soo maraan, oo waxaa ka mid ah Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha haddii ay rabto in ay hubiso sida aan ugu hoggaansameyno sharciga federaalka ee dhowridda xogta dadweynaha.

Si aan uga jawaabno codsiyo ah tabarrucaadda xubno iyo qeybo jirka ka mid ah

Sida aan macluumaadkaaga caafimaadka meelo kale ula sii wadaagi karno waa markaad adigu meelo kale ka heleyso xubno jirka la geliyo.

Si aan ula shaqeyno dhakhtar ah meydbaare ama agaasime ku hawlan aasidda meydka
Waxa aan macluumaadkaaga caafimaadka la wadaagi karnaa qof loo xilsaartay baarista meydka, dhakhtar ah meydbaare, ama agaasime ku hawlan aasidda meydka marka uu qof dhinto.

Si aan ugu eegno magdhowga shaqaalaha, arrimo la xiriira sharciga, iyo codsiyada kale ee dowladda:
Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka isticmaali karnaa ama meelo kale la sii wadaagi karnaa markay jiraan:

- Dacwo la xiriirta magdhawga shaqaalaha.
- Ujeeddooyin la xiriira fulinta sharciga ama hawsha ciidanka booliiska
- Hay'ado caafimaadka u kormeeraya hawlo uu sharcigu u oggol yahay.
- Hawlo dawladeed oo gaar ah sida ciidanka xoogga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha sida sharciga waafaqsan.

Si aan uga jawaabno dacwado iyo eedeymo sharci ah
Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka meelo kale la wadaagi karnaa marka aan ka jawaabeyno amarka maamul maxkamadeed ama maxkamad, ama si aan uga jawaabno u-yeeris maxkamadeed.

Waajibaadkeena

- Waxa sharci ahaan khasab nagu ah in aan dhowrno amniga iyo xogta dadweynaha ee macluumaadka xafidan ee caafimaadka.
- Waxaan sida ugu dhakhsaha badan kuugu soo sheegeynaa haddii ay dhacdo xadgudub kasta oo laga yaabo in uu waxyeelleeyo ku keeno xogta iyo amniga macluumaadkaaga.
- Waxaa khasab nagu ah in aan raacno waajibka isticmaalidda ah ee naga saaran xogta shakhsiga ah ee dadweynaa sida ku qoran ogeysiiskan sharciga ah oo aan koobbiga kaa siineyno.
- Macluumaadkaaga uma isticmaali karno ama meelo ulama sii wadaagi karno wax aan ka ahayn sida halkan ku qaran haddii aadan adigu noogu soo sheegin si qoraal ah. Waxaan kuu sameyn karnaa wixii aad naga soo codsato, oo adiga ayaa codsigaaga beddeli kara markii aad rabto. Si qoraal ah noogu soo sheeg haddii aad codsigaaga beddeleyso.

Wixii macluumaad dheeraad ah ka eego:
www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html**.**

Waxyaabaha laga Beddeli Karo Shuruudaha Ogeysiiskan

Wax baa laga beddeli karaa shuruudaha ogeysiiskan, oo wixii laga beddelo waxa ay khuseyn doonaan waa macluumaadka aan adiga kaa hayno oo dhan. Ogeysiiska cusub waxaa ka heleysaa marka aad ka soo codsado xafiiskeena, iyo barta intarnetka ee, www.covidcheckcolorado.org.

COVIDCheck Colorado sharciga ayaa shuruud uga dhigaya dhowridda macluumaadka caafimaadka shakhsiga ah iyo in ay dadka siiso ogeysiiskan oo ku saabsan waajibaadka sharciga ah iyo isticmaalidda xogta dadka marka laga hadlayo macluumaadkooda caafimaadka. Haddii aad su'aalo ka qabto qeybo ka mid ah ogeysiiskan ama aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada shakhsi ahaaneed, fadlan la xiriir: Sydney Wu adigoo soo garaacaya

720-419-1087 ama farriin ugu soo dir privacy@covidcheckcolorado.org. Haddii aad la hadli weydo Sydney Wu, waxaad ka qabsan kartaa ballan ah kulan shakhsi ahaaneed ama in aad khadka taleefanka ku wada hadashaan laba maalmood oo ah maalmaha shaqada gudahood.

Cabashooyinka

Cabashooyinka ku saabsan xuquuqdaada shakhsiga ah, ama sida COVIDCheck Colorado u isticmaali karto macluumaadkaaga caafimaadka waa in aad kala hadasho Sydney Wu adigoo soo garaacaya 720-419-1087 ama farriin ugu soo dir privacy@covidcheckcolorado.org. Haddii aad la hadli weydo Sydney Wu, waxaad ka qabsan kartaa ballan ah kulan shakhsi ahaaneed ama in aad khadka taleefanka ku wada hadashaan laba maalmood oo ah maalmaha shaqada gudahood. Haddii aad ku qanci weydo qaabka uu xafiiskan uga soo jawaabayo cabashadaada, waxaad cabasho rasmi ah u soo gudbin kartaa Xarunta Jawaabaha Macmiishaa: HHS/Office for Civil Rights 1961 Stout Street Room 08-148 Denver, CO 80294 Customer Response Center: (800) 368- 1019 TDD: (800)537-7697 Boostada Intarnetka (email): ocrmail@hhs.gov.

Taariikhda Ogeysiiskan ka Bilaabanayo: 16-ka Ogoosto, 2021

Markaan magacayga hoos ku qoro, waxaan qirayaa in aan helay oo akhristay Ogeysiiska Isticmaalidda Xogta Shakhsiga Ahaaneed, oo waxaan oggolahay in macluumaadkeyga loo isticmaalo si waafaqsan Ogeysiiskan, sidaas awgeed qoraalka magacayga ee hoose ayaa ah qirasho u qalanta in aan anigu gacanteyda ku saxiixay Ogaysiiskan.